



Foomka Lacagta Magdhawga Ah ee Dhibanayaasha Fal Dambiyeedka

Foomkan ma aha kan la buuxinayo ee maxkamadda loo soo gudbinayo

Dhibanayaasha fal dambiyeedka waxa uu dastuurku xaqu siinaya in magdhaw buuxa looga qaado dadka u geystay fal dambiyeedka ay dhibaatada ka soo gaartay.ⁱ Dhibanayaasha ayaa codsan kara in magdhaw looga qaado, laakiin khasab kuma ah. Magdhawga waxaa la siin karaa dhibanayaasha leh dhaxalka dhibanaha geeriyooyad. Foomkan waxaa loogu talo galay inuu kaa caawiyo soo ururinta macluumaadka looga baahan yahay dhageysiga magdhawga ka dib marka eedeysanaha lagu helo dambiga ama lagu qaado dambiga uu deystay. Muhim ma aha in magdhawgu bixiyo dhamaan dhibaatada dhibanaha soo gaartay. Dhibanaha waxa uu fursad u leeyahay inuu maxkamad madani ah ka dacweyn karo eedeysanaha haddii ay sidaas muhim noqoto.

WAA MAXAY MAGDHAWGU?

Magdhawga waa "dhaqaale ka lumay" magdhaw ah oo ka dhalatay fal dambiyeed dhacay. Dhibanaha waxaa loo celin karaa "dhaqaale ka lumay" oo ay heysteen ama heli lahaayeen fal dambiyeedka dartiis, oo ay ka mid tahay laakiin aan ku koobneyn:

- Qiimaha dhan ama qeyb ka mid ah hantida burburku soo gaaray (qiimaha lagu bedelo hantida ama kharshka dhabta ah ee lagu dayactiray hantida haddii uu dayactirku yahay mid suurogal ah);
- Kharashka daaweynta
- Kharashka la talinta xagga dhimirka
- Mushaharka ama macaashka kaa baaqday taasoo ay ugu wakan tahay dhaawac ku soo gaaray, ama dakhli ku soo geli lahaa oo kaa baaqday; iyo
- Kharash la xiriira dayactirkha gaariga ama hoyga aad degan tahay oo u baahday in laga dhigo mid aad geli karto naafanimo kaa soo gaartay fal dambiyeedka darteed. ⁱⁱ

SIDEE AYAA LOO CODSADAA MAGDHAWGA?

Si aad u codsato magdhaw, adiga, wakiilka dhibanaha, ama qareenkaaga waa in aad la socodsiisaa xeer ilaalinta in aad codsaneyaan magdhaw. Codsigaas waxa aad u soo gudbin kartaan markasta ka hor inta aan la xukumin eedeysanaha ama aysan maxkamaddu ogolaan heshiiska qirashada dacwada. Waa in aad maxkamadda aad siisaan waqtii ku filan oo ay ku qaban karaan dhageysiga magdhawga hadii ay muhim tahay in la qabto.

SIDEE AYAA GO'AAN LOOGA GAARAA LACAGTA MAGDHAWGA?

Maxkamadda ayaa go'aan ka gaareysa inta ay le'eg tahay magdhawga uu bixinayo eedeysanaha. Waxaa laga yaabaa in la qabto dhageysi oo adiga, wakiilka dhibanaha, qareenkaaga, haddii uu jiro, iyo xeer ilaalinta aad soo bandhigtaan inta ay le'eg tahay dhibaatada dhaqaalahaa kaa lumay ama dhibka ku soo gaaray. Maxkamaddu ma ogolaaneyso wax ka badan dhaqaalahaa kaa lumay ee kaa soo gaaray fal dambiyeedka, maxkamaddu waxa ay ku weydiin doontaa haddii aad lacag ka qaaday ceymiska ama aad heshay gargaarka dawladda. Lacagtaas waxaa laga jarayaa lacagta ay magdhawga ah ee maxkamaddu ay amarto. Eedeysanaha ayaa isagana laga yaabaa inuu dhiniciisa macluumaad soo bandhigo. ⁱⁱⁱ



MAXAA LA IGA DOONAYAA SI AAN U CADEEYO DHAQAALAH AIGA LUMAY?

Adiga, wakiilka dhibanaha, qareenkaaga, ama dadka leh dhaxalka dhibanaha waa in ay hayaan cadeynta dhamaan kharashka ay horay u galeen iyo kan ay geli doonaan ee fal dambiyeedka dhacay cadeeyaan inta uu le'eg yahay dhaqaalaha ka lumay (cadeymaha sida biilasha, lacag qabashada, biilasha caafimaadka.) Cadeyntan Oo dhan waxa ay maxkamaddu u isticmaaleysaa in ay ku ogaato inta ay le'eg tahay lacagta magdhawga ah ee la doonayo in la amro in eedeysanaha uu bixiyo.

MAXAA DHACAY HADDII ADIGA IYO EEDYE SANAH A ISKU RAACSANEYN INTA AY LE'EG TAHAY MAGDHAWGA?

Waxaa laga yaabaa in adiga, wakiilka dhibana, iyo qareenkaaga, dadka leh dhaxalka dhibanaha, iyo eedeysanaha aad isku khilaafaan magdhawgu ay maxkamaddu amartay. Ka dlb maxkamadda ayaa qabaneysa dhageysi looga doodayo inta magdhawgu noqonayo waxaana lagu siinaya fursad aad ku soo bandhigtaan sababta aad ku diidan tiihiin go'aanka maxkamadda. Adiga ama wakiilka dhibanaha ayaa laga yaabaa in ay maxkamadda ka markhaati furan oo ka hadlaan.^{iv}

MAXAA DHACAY HADDII UUSAN EEDYE SANUHU BIXIN LACAGTA?

Maxkamadda amartay magdhawga ayaa awood u leh in ay dhaqangeliso amarka ilaa lacagta oo dhan la bixiyo. Haddii uu eedeysanuhu yahay ilmo yar, waxa ay maxkamadu dhaqan gelineysaa amarkeeda ilaa uu ilmuu ka gaaro 21 jir. Xilligaas ka dib, waxa uu amarka maxkamadda isu bedelayaa xukun dacwad madani ah waxaana fulintiisa la wareegaya degmada ama maxkamadda degmada ee halka uu dhibanaha ama eedeysanuhu degan yahay.

AMARKA MAGDHAWGU MA WUXUU LEEYAHAY TAARIKH UU KU EG YAHAY?

Maya, eedeysanaha ayaa mas'uul ka ah bixinta lacagta ilaa lacagta oo dhan la bixiyo^v, oo lacagta magdhawga, ka dib marka la amro, lama yareyn karo lamana joojin karo haddii adiga ama qareenkaaga aad diidan tiihiin.^{vi} Haddii aad codsato, waxaa laga yaabaa in maxkamaddu kuu ogolaato in aad lacag yar qaadato oo ka yar lacagta ku xusan amarka, haddii ay maxkamaddu go'aan ku gaarto in aan lagugu khasbin aad ogolaato lacag ka yar tan amarka maxkamadda.

ⁱ Qodobka Dastuurka Ohio I, Qeybta 10a(A)(7)

ⁱⁱ R.C. 2152.203(B) and R.C. 2929.281(A)

ⁱⁱⁱ R.C. 2152.20(A)(3) and R.C. 2929.28(A)(1)

^{iv} R.C. 2152.20(A)(3) and R.C. 2929.28(A)(1)

^v R.C. 2152.203(F) and R.C. 2929.18(A)(1)

^{vi} R.C. 2152.203(E) and R.C. 2929.281(D)



SIDA LOO BUUXIYO FOOMKAN

Foomkan waa mid loogu talo galay inuu ka caawiyo adiga ama dhibanaha ama dadka leh dhaxalka dhibanaha soo ururinta macluumaadka la doonayo in go'aan looga gaaro dhaqaalaha kaa lumay si loo xisaabo magdhawga. Waxa aad mas'uul ka noqoneysaa in aad keento cadeymaha si loo xaqijiyo tirada aad ku buuxisay foomka.

**Foomkan waa in loo gudbiyaa xeer ilaalinta dawcadda u xilsaaran ama qareenkaaga iyada oo la soo raacinayo wixii cedeymo ah.
Waa in aad ka reebataa nuqul (koobi) cadeymaha aad soo gudbiso.**

Qeybta 1: MACLUUMAADKA DHIBANAHA

Magaca dhibanaha: _____ Lamarka gal dacwadeedka: _____

Cinwaanka: _____ Magaalada: _____, Gobolka: _____,
Nawaaxiga: _____

limeylkaaga: _____ Lambarada Telefoonka: _____

Haddii aad tahay WAKILKA DHIBANAHA, fadlan halkan ku qor magacyadooda iyo halka laga xiriirayo.

Magac: _____ Lambarada Telefoonka: _____

Cinwaanka: _____ Magaalada: _____, Gobolka: _____,
Nawaaxiga: _____

limeylkaaga: _____

Haddii aad tahay QAREEN, fadlan halkan ku qor magacyadooda iyo halka laga xiriirayo.

Magac: _____ Magaca Xafiiska: _____

Cinwaanka: _____ Magaalada: _____, Gobolka: _____,
Nawaaxiga: _____

limeylkaaga: _____ Lambarada Telefoonka: _____



Qeybta 2: HANTIDA LA XADAY AMA BURBURTAY EE LA XIRIIRTA FAL DAMBIYEEDKA

Hantida hoos ku xusan ayaa la xaday ama burburtay: _____

Hantida waa dayactir lagu sameyn karo.

Hantida lagu sameynayo dayactir: _____

Kharashka dayactirka: _____

Taariikhda dayactirka lagus ameeyey: _____

Hantida waa in la bedelaa.

Hantida la bedelayo: _____

Kharashka bedelidda: _____

Taariikhda hantida lagu bedelay idin soo gaartay: _____



Waa inaad sooso raacisaan cadeynta kharashka kor ku xusan.

CADEYMAHA LA IDINKA DOONAYO: Waa inaad keentaa lacag qabashada iyo cadeymaha kale ee cadeynaya lacagta dayactirka lagu bixiyey, taariikhda la bixiyey, iyo cidda dayactirka sameysay. Hantida la bedelay, waa inaad keentaa biilka ama lacag qabashada cadeyneysa midda aad sooso iibsatay. Waa in ay noqotaa mid uusan bixin ceymiska gaariga, guriga, ganacsiga ama noocyada kale ee ceymiska ama barnaamijyada dawladda.

Qeybta 3: KHARASHKA CAAFIMAADKA LA XIRIIRA FAL DAMBIYEEDKA

Waxaan bixiyey kharashka hoos ku xusan oo uusan bixin ceymiska caafimaadka ama barnaamijyada dawladda:

- Kharashka la xiriira isbitaalka: \$ _____ Booqashada dhakhtarka: \$ _____
- Qalabka caafimaadka \$ _____ Kharashka daaweynta jirka: \$ _____
- Indha gashiga iyo gargaarka maqalka: \$ _____ Daawada dhakhtarku ii qoray: _____
- Kharashyada kale (faahfaahi) _____ \$ _____



Waa inaad sooso raacisaan cadeynta kharashka kor ku xusan.

CADEYMAHA LA IDINKA DOONAYO: Waa inaad keentaa cadeynta lacag qabashada iyo cadeymaha kale ee cadeynaya inaad bixisay biilasha, booqashada dhakhtarka, kharashka caafimaadka, sheybaarka, qalabka caafimaadka, daawada laguu qoray, iyo kharashyada kale ee la xiriira daaweynta oo uusan bixin kaarka caafimaadka ama barnaamijyada gargaarka dawladda. Waa inaad ku cadeysaa taariikhda isbitaalka lagu dhigay iyo balamada dhakhtarka. Waxa kale oo lagaa doonayaa inaad keento cadeynta ceymiska caafimaadka.



Qeybta 4: KHARASHKA LA TALINTA CUDURADA DHIMIRKA LA XIRIIRA FAL DAMBIYEEDKA

Waxa aan bixiyey kharashka hoos ku xusan oo uusan bixin ceymiska caafimaadka ama barnaamijyada dawladda:

- Xafiiska daaweynta jirka: \$ _____ Daawada dhakhtarku ii qoray: \$ _____
- Kharashyada kale (faahfaahi) _____ \$ _____



Waa inaad soo raacisaan cadeynta kharashka kor ku xusan.

CADEYMAHA LA IDINKA DOONAYO: Waa inaad keentaa cadeynta lacag qabashada iyo cadeymaha kale ee cadeynaya inaad bixisay kharashka la talinta caafimaadka, booqashada dhakhtarka, iyo kharashyada kale ee la xiriira daaweynta oo uusan bixin kaarka caafimaadka ama barnaamijyada gargaarka dawladda. Waa inaad ku cadeysaa taariikhda balamada la talinta. Waxa kale oo lagaa doonayaa inaad keento cadeynta ceymiska caafimaadka.

Qeybta 5: MUSHAHARKA, MACAASHKA, IYO FAA'IIDADA KAA BAAQATAY EE LA XIRIIRTA FAL DAMBIYEEDKA

Waxaa iga baaqday dakhli sida mushahar, macaash iyo faa'iido aan ka heli lahaa alaaboo aan gado.*

- Waxaa iga baaqday mushahar.

Lacagta mushaharka kaa baaqday: _____

Taariikhda maalamaha aad shaqeyn kari weysay: _____

- Waxa aan shaqada dib ugu noqday _____

- Waxa aan shaqada dib ugu noqonayaa _____

- Shaqada dib uguma nqon doono.

- Waxaa iga baaqday macaash

Lacagta macaashka kaa baaqday: _____

Taariikhda dakhliga kaa baaqday: _____

- Dakhliga iga baaqday alaabada aan gado.

Lacagta kaaga baaqatay alaab aad gaddo: _____

Taariikhda uu kaa baaqday dakhliga alaabada aad gaddo: _____

Dhakhtarka cadeynaya mudada aad shaqada ka maqneyd waa: _____ Lambarka telefoonka dhakhtarka: _____

Cinwaanaka dhakhtarka _____



Ma lagu siiyey (*dooro dhamaan kuwa ku haboon*): Naafanimo Ceymiska shaqaalaha dhaawac soo gaaro Ururada shaqaalaha/ceymiska shaqo la'aanta

- Gargaarka cuntada/lacag cadaan ah
- Magdhawga dhibanayaasha
- Kuwo kale (*faahfaahii*)



Waa inaad soo raacisaan cadeynta kharashka kor ku xusan.

CADEYMAHA LA IDINKA DOONAYO: Waa inaad soo gudbisaa halka lagala xiriirayo goobta shaqada, qeybta dambe ee jeegga, foomka W-2 ee canshuuraha, warbixinta maaliyadda, canshuur celinta, ama aqoonsiyada kale ee cadeynta u noqon kara dakhliga ku soo gala. Waxaa kale oo lagaa doonayaa in aad soo gudbiso diiwaanka wixii lacag ah ama laguu celiyey oo dakhliga kuu bedelay mudadii aadan shaqeeyn karin. Dakhliga kaa soo gala alaabada aad gaddo, cadeynta dakhliga laba iyo tobankii bilood ee la soo dhaafay laga soo bilaabo maanta uu fal dambiyeedku dhacay. *Xaq uma lihid mushahar kaa baaqday waqtiga aad maxkamadda kaga qeyb galeysay dhageysiga dacwadda. [State v. Yerkey, 2022-Ohio-4298.]

Qeybta 6: KHARASHKA FUDUDEYNTA EE LA XIRIIRA FAL DAMBIYEEDKA

Waxa aan bixiyey kharash sidii gurigeyga iyo gaarigeyga u noqon lahayeen mid aan geli karo naafanimo darteed.

Wax ka bedelka gaariga

Kharashka wax ka bedelidda:

Soo koobidda wax ka bedelidda:

For more information about the study, please contact Dr. John Smith at (555) 123-4567 or email him at john.smith@researchinstitute.org.

Taariikhda uu wax ka bedelku dhacay

Wax ka bedelka guriga

Kharashka wax ka bedelidda:

Soo koobidda wax ka bedelidda:

For more information about the study, please contact Dr. John Smith at (555) 123-4567 or via email at john.smith@researchinstitute.org.

Taariikhda uu wax ka bedelku dhacay: _____



Waa inaad soo raacisaan cadeynta kharashka kor ku xusan.

CADEYMAHA LA IDINKA DOONAYO: Waa inaad keentaa lacag qabashada iyo cadeymaha kale ee cadeynaya lacagta wax ka bedelka gaariga iyo guriga la bixiyey, taariikhda la bixiyey, iyo cidda wax ka bedelka sameysay sameysay.



Qeybta 7: SOO KOOBIDDA DHAQAALAHKA KAA BAAQDAY EE LA XIRIIRA FAL DAMBIYEEDKA

Waxa aad xaq u leedahay in magdhaw lagaa siiyo dhaqaalaha kaa lumay ama dhibaatada ku soo gaartay. Lacagta magdhawga ah waxaa laga jarayaa lacagta aad ka hesho ceymiska iyo hay'adaha dawladda ee dhaqaalaha kaa baaqday ee la xiriira fal dambiyeedka.

DHAQAALAHKA KAA LUMAY

- Lacagta aad ku bixisay dayactirkha/bedelidda hantida la xaday/burburtay \$ _____ waxa aan hayaa cadeyn aan ku cadeyn karo.
Kharashka iiga baxay caafimaadka \$ _____ waxa aan hayaa cadeyn aan ku cadeyn karo.
Kharashka iiga baxay la talinta cudurada dhimirka \$ _____ waxa aan hayaa cadeyn aan ku cadeyn karo.
Lacagta mushaharka, macaashka ama dakhliga alaabada aan gado \$ _____ waxa aan hayaa cadeyn aan ku cadeyn karo.
Kharashka iiga baxay wax ka bedelka gadiidka iyo guriga \$ _____ waxa aan hayaa cadeyn aan ku cadeyn karo.
- Wadarta Guud ee Dhaqaalaaha Iga Baaqday** \$ _____

DIB UGU CELINTA AMA MAGDHAWGA QIIMAH A HANTIDA LA XADAY AMA BURBURTAY EE LA XIRIIRTA FAL DAMBIYEEDKA

- Lacagta aan ka helay ceymiska gawaarida \$ _____ waxa aan hayaa cadeyn aan ku cadeyn karo.
Lacagta aan ka helay ceymiska guriga \$ _____ waxa aan hayaa cadeyn aan ku cadeyn karo.
Lacagta aan ka helay ceymiska ganacsiga \$ _____ waxa aan hayaa cadeyn aan ku cadeyn karo.
Lacagta aan ka helay ceymiska caafimaadka \$ _____ waxa aan hayaa cadeyn aan ku cadeyn karo.
Lacagta aan ka helay gargaarka dawaladda \$ _____ waxa aan hayaa cadeyn aan ku cadeyn karo.
Gargaarka kale ee aan helay \$ _____ waxa aan hayaa cadeyn aan ku cadeyn karo.
Kubo kale (*fadlan faahfaahi*) \$ _____ waxa aan hayaa cadeyn aan ku cadeyn karo.

Wadarta Guud Ee Lacagta magdhawga/dib la isu celiyey \$ _____

Wadarta Dhaqaalaaha Iga Baaqday \$ _____ — (laga jaray) Wadarta Guud Ee Lacagta magdhawga/dib la isu celiyey \$ _____ = \$ _____

**Lacagta
magdhawga ee
la codsanayo**

